

Soo Xareey Canshuurta Si Lacag Dib Laguu (Laguugu) Celiyo

Waxaad u-qalmi kartaa kuman kun oo doollar ee soo celinta cashuurtaada marka aad dalbato Gunnada Cashuurta Dakhliga ee Federaalka (federal Earned Income Tax Credit), Gunnada Canshuurta Ilmaha (Child Tax Credit), ama Gunnada Daryeelka Ilmaha iyo Kuwa Kugu Tiirsan (Child and Dependent Care Credit). Haddii aad sanadkan u qalanto hal ama ka badan oo gunnada canshuurta ah, waxaad heli kartaa lacag ka badan sidii hore.

Sida Loo Helo Gunnada Cashuurtaada:

- 1 Eeg ama fiiri haddii aad u qalanto**
Ka eeg ama fiiri inta aad heli karto TaxOutreach.org/TaxCredits.
- 2 Hel caawimo canshuureed oo bilaash ah**
Tag GetYourRefund.org ama wac 800-906-9887, xitaa (xataa) haddii aadan sida caadiga ah u xareeynin canshuur.
- 3 Xareey canshuurtaada**
Hel caawimo lacag la'aan ah si aad u xareeysid canshuurtaada ka hor Abriil 18.

Waxa lagaa rabo in aad keento maalinta ballanta canshuurta aad leedahay:

- Warqad Aqoonsi oo leh sawirkaaga
- Kaarka Lambarka Bulshada (Social Security), Warqadda xaqiijinta lambarka Bulshada, ama ITIN (oo ah waqad la siiyo dadka aanan heli karin Lambarka Bulshada loo yaqaan Social Security Number) ee qof kasta oo ku jira canshuurtaada
- Foomamka W-2 ama 1099
- Foomka 1095-A
- Warqad ama warqado cadeeynaayo oo lacagaha daryeelka ilmaha (haddii la codsanayo Gunnada Daryeelka Ilmaha iyo Kuwa Kugu Tiirsan)
- Ogeysiis kasta oo IRS ah oo ay ku jiraan Warqadda IRS 6419, Lacag-bixinnada Hore ee Canshuurta Gunnada Ilmaha



Wixii macluumaad intaas ka badan, tag TaxOutreach.org/TaxCredits ama IRS ka wac 1-800-829-1040.

Miyaan u qalmaa?

Waa markii ugu horeysay, dad ka badan sidii hore ayaa u qalmi doona gunnada canshuurta federaalka waxayna dib u heli karaan lacag

Gunnada Canshuurta Dakhliga

La Helay (EITC): Haddii aad shaqeysay 2021, waxaad u qalmi kartaa EITC xataa haddii aadan hore u helin.

Gunnada Amaahda Canshuurta.

Waxay hoos u dhigi kartaa canshuurtaada haddii ilmo aad leedahay (CTC): Ku dhawaad qoys kasta oo carruurtood la dhagan yihiinayaa u qalma CTC sanadka 2021. Waxaad heli kartaa gunnadaan xataa haddii aad hawlgab tahay, naafo tahay, ama aanad hore ugu qalmin. Soo xarey canshuurtaada si aad u hesho gunnada oo dhan xataa haddii aad 2021 heshay lacag bixinta hore ee CTC.

Gunnada Daryeelka Ilmaha iyo Kuwa Kugu Tiirsan (CDCTC):

Malaayiin qoys oo bixiya kharashka daryeelka carruurta iyo dadka waaweyn ayaa u qalma CDCTC.

Manfacyada Dadweynaha:

Soo codsiga gunnoyiinkaan cashuureed ma beddeli doonto u-qalmitaankaaga manfacyada federaalka sida SNAP (food stamps), SSI, Medicaid, kaalmada lacagta caddaanka ah, ama guryaha dadweynaha. Haddii aad kaydsato lacagkaaga soo noqotay canshuurta, laguma xisaabin doono barnaamijka manfaca uu federaalku bixiyo ilaa 12 bilood ka dib marka lacag-celinta la helo.

u-qalmitaanka kala duwan EITC, CTC, iyo CDCTC:

Haddii aadan carruur qabin

waxaad u qalmi kartaa EITC haddii:

Da'da:

Aad tahay 19 jir iyo ka wayn. Ma codsan kartid gunnada haddii aad arday ahayd in ka badan 5 bilood 2021 oo aad tahay 19-23 jir.

Dakhliga 2021:

Waxaad heshay wax ka yar \$21,430 (\$27,380 haddii aad xaas leedahay), waxaad heli kartaa EITC ilaa \$1,502.

Haddii aan ahayn muwaadin Maraykan ah

waxaad u qalmi kartaa mid ka mid ah saddexda gunnooyin canshuur haddii:

- **EITC:** Adiga, xaaskaaga, iyo ilmo kasta oo aad u codsanayso ay haystaan Lambarka Caymiska Bulshada oo sax ah (SSN).
- **CTC:** Ilmo kasta oo aad u codsanaysooo haysto SSN, xataa haddii adiga aadan haysan SSN.
- **CDCTC:** Ilmo kasta oo aad u codsanayso oo haysto SSN, xataa haddii adiga aadan haysan SSN.

Haddii aad carruur leedahay waxaad u qalmi kartaa mid ka mid ah saddexda gunnooyin canshuur haddii:

Deganaanshaha:

Carruurtaadu ay kula noolaayeen in ka badan sanadka 2021 nuskiisa.

Da'da - carruurta waa inay ahaadaan:

- **EITC:** 18 jir ama ka yar Diseembar 31, 2021 (*ardayda wax barto wakhtiga buuxa ama badankiis waxay ka y karaan 24 jir iyo carruurta sida joogtada ah iyo carruurta aad iyo aad naafada ah waxay noqon karaan da' kasta*).
- **CTC:** 17 jir ama ka yar Diseembar 31, 2021.
- **CDCTC:** 13 ama ka yar Diseembar 31, 2021, ama qof kugu tiirsan oo aan awoodin in uu is daryeelo.

Dakhliga sanadka 2021:

- **CTC-da federaalka,** looma baahno in aad leedahay ydakhliga ugu yar si aad u hesho gunnadaan. Waxay u qalantaa ilaa \$3,600 carruurta 5 jir ah iyo ka yar, iyo ilaa \$3,000 carruurta da'doodu tahay 6-17 jir.

- **EITC Federaalka ah,** dakhligaagu waa inuu ka hooseeyaa xadka soo socda:

Tirada Carruurta:	Shaqale keligood ah oo dakhligoodu ka yar yahay:	Labo qof oo is qabo oo shaqeeyo oo dakhligoodu ka yar yahay:	EITC ilaa:
1 ilmo	\$42,158	\$48,108	\$3,618
2 carruur	\$47,915	\$53,865	\$5,980
3 carruur ama ka badan	\$51,464	\$57,414	\$6,728

- **CDCTC federaalka ah,** lacagta aad dib u heli karto waxay ku xiran tahay tirada carruurta ku jirta daryeelkaaga, dakhliga qoyskaaga, iyo lacagta aad ku bixiyo daryeelkooda.

Tirada Carruurta:	kharashka kaaga baxaydaryeelka ee 2021	Dakhliga	Gunnada ugu badnaan
1 ilmo	Ilaa \$8,000	\$0-\$125,000	\$4,000
		\$125,000-\$183,000	Kala duwan
		\$183,000-\$400,000	\$1,600
2 carruur	Ilaa \$16,000	\$0-\$125,000	\$8,000
		\$125,000-\$183,000	Kala duwan
		\$183,000-\$400,000	\$3,200